**Tix:** XGBGM/0025/20 **Tar:** 27 October 2020

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug Galmudug= Dhusamareb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGM**

**Mudane Madaxweyne,**
Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:XMGM/10/036 kuna taariikhaysneed 11/10/2020 kana timid Madaxweynaha DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2020, Fadhiyadiisii 11, 12, 13 iyo 14, Shuruucda kala ah;

1 Sharciga Maareynta Deeganka Sharci LR:001. 18 October 2020.
2 Sharciga Hay'adaha Samafalka & Horumarinta aan Dawliga ahayn Sharci LR:002. 19 October2020.
3 Sharciga Dhismaha Booliska Galmudug Sharci LR:003. 21 October 2020.
4 Sharciga Golayaasha Deeganka Dawladaha Hoose Sharci LR:004. 22 October 2020.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 4 taan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

Naga guddon Mudnaan iyo Qaderin

Lifaaqa Shuruucdii Baarlamaanku Ansixiyey;

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha Baarlamaanka DGGM

*Jamhuuriyadda Faderaalka Soomaaliya*
Dowlad Goboleedka Galmudug
Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفدرالية
حكومة اقليم جلمدج
مكتب الرئيس

**Galmudug State**
**Office of the President**

**SHARCI Lr.003** **Taariikh: 31/10/2020**

**ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA BOOLISKA GALMUDUG**

**MADAXWEYNAHA D.G**

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowladda Galmudug

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 69aad ee Dastuurka D.G farqaddiisa 1aad xarafka (a)

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0025/20 ee 27 October 2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Dhismaha Booliska Galmudug

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida Galmudug ay u qabto Sharciga Dhismaha Booliska

**Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan**:

**Qodobka 1aad:**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la ogolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Dhismaha Booliska Galmudug

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha D.G saxiixo. Laga bilaabo marka la saxiixo waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kaste oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee D.G.

**Dhusamareb 31/10/2020**

**Madaxweynaha D.G**
**Axmed Cabdi Kaarie**

*JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA*

*DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG*

# *SHARCIGA CIIDANKA BOOLISKA DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG EE SOOMAALIYA*

**[SHARCI LR 003/2020]**

***October 2020***

# TUSMO


| | | |
|---|---|---|
| **QAYBTA I** | **HORDHAC** | **5** |
| **CUTUBKA 1aad** | **MABAADI'IDA GUUD** | **5** |
| Qodobka 1aad | Eraybixin | 5 |
| Qodobka 2aad | Magaca Xeerka | 6 |
| Qodobka 3aad | Mabaadi'da guud | 6 |
| Qodobka 4aad | Ujeedada Xeerka | 7 |
| Qodobka 4aad | Hoggaaminta Guud | 7 |
| Qodobka 5aad | Gudashada Dhaarta | 8 |
| **QAYBTA II** | **QAAB DHISMEEDKA** | **7** |
| **CUTUBKA 2AAD** | **MAGACAABISTA, QORISTA, & HAWLAHA** | **7** |
| Qodobka 7aad | Taliyaha & Taliye Xigeennada | 8 |
| Qodobka 8aad | Maqaamka Xubnaha | 8 |
| Qodobka 9aad | Saraakiisha Ciidanka Booliska | 9 |
| Qodobka 10aad | Kormeerayaasha Ciidanka Booliska | 9 |
| Qodobka 11aad | Alifleyda Ciidanka Booliska | 9 |
| Qodobka 12aad | Dableyda Ciidanka Booliska | 10 |
| Qodobka 13aad | Waajibaadyada Guud | 10 |
| Qodobka 14aad | Awoodda Ciidamada Booliska | 11 |
| Qodobka 15aad | Waajibaadyada Garsoorka | 11 |
| Qodobka 16aad | Waajibaadyada Dhaqaalaha & Maaliyadda | 11 |
| Qodobka 17aad | Waajibaadyada Xaaladaha Gaarka ah | 12 |
| Qodobka 18aad | Xiriirka Hay'adaha Amniga ee Heer Deegaan | 12 |
| **CUTUBKA 3AAD** | **XILALKA & XUQUUQDA XUBNAHA CIIDANKA BOOLISKA** | 11 |
| Qodobka 19aad | Xilalka Xubnaha Ciidanka Booliska | 12 |
| Qodobka 20aad | Mamnuucidda Fulinta Hawlo ka Baxsan Sharciga | 13 |

| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 21aad | Mamnuucidda Shaacinta Xogaha Xafiiska | 13 |
| Qodobka 22aad | Mushaarka & Gunnooyinka | 13 |
| **CUTUBKA 4AAD** | **QAAB-DHISMEEDKA** | **13** |
| Qodobka 23aad | Qaab-Dhismeedka Ciidanka Booliska | 13 |
| Qodobka 24aad | Awoodda & Mas'uuliyadaha Taliyaha | 14 |
| Qodobka 25aad | Awoodaha & Hawlaha Taliye Xigeennada | 15 |
| **CUTUBKA 5AAD** | **SHURUUDAHA QORISTA CIIDANKA** | **15** |
| Qodobka 26aad | Soo Qorista Xubnaha | 15 |
| Qodobka 27aad | Xulista Xubnaha | 16 |
| Qodobka 28aad | Imtixiaanka Kama Dambaysta ah | 16 |
| Qodobka 29aad | Uddalacidda Jago Sarkaal & Qiimayn | 16 |
| Qodobka 30aad | Kala Sarraynta Dallacsiin Sarkaal | 16 |
| **CUTUBKA 6AAD** | **SHAQOOYINKA & HAWLAHA CIIDANKA** | **17** |
| Qodobka 31aad | Shaqooyinka Joogtada ah | 17 |
| Qodobka 32aad | Shaqo Ku Jiris | 17 |
| Qodobka 33aad | Fasax Ku Maqnaan | 17 |
| Qodobka 34aad | Shaqo La Hakiyay | 18 |
| Qodobka 35aad | Joojinta Shaqooyinka Joogtada ah | 18 |
| **CUTUBKA 7AAD** | **DALLACAADDA** | **19** |
| Qodobka 36aad | Shuruudaha Dallacaadda | 19 |
| Qodobka 37aad | Noocyada Dallaacadda | 19 |
| Qodobka 38aad | Mudnaan Dallaacaad | 20 |
| Qodobka 39aad | Muteysi Dallacaad | 20 |
| Qodobka 40aad | Mutaysiga Dallaacaad Gaar ah | 20 |
| Qodobka 41aad | Liiska Mudnaanta | 20 |
| Qodobka 42aad | Guddiga Qiimaynta | 19 |
| Qodobka 43aad | Qiimaynta Dallacaadda | 21 |
| **CUTUBKA 8AAD** | **FASAXA, MUSHAARKA, & MAQAAMKA XUBNAHA** | **22** |

| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 44aad | Mushaarka | 22 |
| Qodobka 45aad | Goynta & Dhimista | 22 |
| Qodobka 46aad | Geeri, Naafo, Dhaawac & Caafimaad Darro | 23 |
| Qodobka 47aad | Fasax Caadi ah | 23 |
| Qodobka 48aad | Xubnaha Waxbarasho ugu Maqan Dalka Dibaddiisa | 23 |
| Qodobka 49aad | Fasax Ururay | 23 |
| Qodobka 50aad | Ku Daahiid Fasax | 24 |
| Qodobka 51aad | Awoodda Fasax Bixinta | 24 |
| Qodobka 52aad | Maqaamka Sharciyadeed ee Xubnaha Fasaxa ah | 24 |
| Qodobka 53aad | Diiwaan Gelinta Fasaxa | 24 |
| Qodobka 54aad | Shahaadada Shaqo Fariisinta | 24 |
| **QAYBTA III** | **ANSHAXA** | **25** |
| **CUTUBKA 9AAD** | **MABAADI'IDA GUUD EE GEFAF ASLUUBEEDKA IYO CIQAABTA** | **25** |
| Qodobka 55aad | Faritaannada Sharciyada & Xeerarka Kale | 25 |
| Qodobka 56aad | Xeerarka Guud ee La Xiriira Qaadista Gefaf Asluubeedka | 25 |
| Qodobka 57aad | Waajibnimada Wax Ka Qabashada Gef Asluubeedka | 25 |
| Qodobka 58aad | Tallaabooyinka Xakamaynta Hordhaca ah | 25 |
| Qodobka 59aad | Ganaaxyada Laga Jarayo Mushaarka | 26 |
| Qodobka 60aad | Qaanbixinta ama Waxyeelooyin Kale ama Lumin Mushaar | 26 |
| **CUTUBKA 10AAD** | **KARTI-U-YEELASHADA IYO NIDAAMKA** | **26** |
| Qodobka 61aad | Karti-u-Yeelashada | 26 |
| Qodobka 62aad | Nidaamka Dhagaysiga Gef Asluubeedka | 26 |
| Qodobka 63aad | Awoodda Taliyaha ee Wax Ka Beddilidda Xukun Ciqaabeed | 27 |
| **CUTUBKA 11AAD** | **GEFAF ASLUUBEED** | **27** |
| Qodobka 64aad | Gefafka | 27 |
| **CUTUBKA 12AAD** | **CIQAABTA & RACFAANKA** | **30** |
| Qodobka 65aad | Ciqaabta | 30 |
| Qodobka 66aad | Oogista Ciqaab Asluubeed | 31 |

| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 67aad | Racfaanka | 32 |
| Qodobka 68aad | Gudbinta Racfaaannada | 32 |
| **CUTUBKA 13AAD** | **MUTAYSIYADA SHAQADA** | **33** |
| Qodobka 69aad | Aqoonsiga Muteysi Gaar Ahaaneed oo Shaqo | 33 |
| Qodobka 70aad | Abaalmarinnada La Bixin Karo | 33 |
| Qodobka 71aad | Faafinta Abaalmarinnada | 34 |
| **CUTUBKA 14AAD** | **QODOBO GUUD** | **34** |
| Qodobka 72aad | Miisaaniyadda Ciidanka Booliska | 34 |
| Qodobka 73aad | Hanti-Dhawrka Ciidanka Booliska | 33 |
| Qodobka 74aad | Dhismaha Sanduuqa Daryeelka Ciidanka Booliska | 35 |
| Qodobka 75aad | Gal Shaqsiyadeedka Ciidanka Booliska | 35 |
| Qodobka 76aad | Kala Saraynta Darajooyinka | 35 |
| Qodobka 77aad | Garaadaha Darajooyinka | 36 |
| Qodobka 78aad | Dareeska & Qalabka | 36 |
| Qodobka 79aad | Habraacyada | 36 |
| Qodobka 80aad | Xeernidaamiyaasha | 36 |
| Qodobka 81aad | Baabi’in | 36 |
| Qodobka 82aad | Dhaqangal | 36 |

# QAYBTA I

## HORDHAC

# CUTUBKA 1aad

## MABAADI'IDA GUUD & UJEEDOOYINKA

# QODOBKA 1aad

## Erey bixin

Haddii aan si kale loogu qeexin halkan, erayada soo socda waxaa loola jeedaa:

**"Madaxweyne"** waa Madaxweynaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Wasiir"** waa Wasiirka Amniga Gudaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Wasaarad"** waa Wasaaradda Amniga Gudaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Taliye"** waa Taliyaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Ciidan"** waa Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Talis"** waa Taliska Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Qeyb"** waa Taliska Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug ee heer Gobal;

**"Waax"** waa Ciidan ka tirsan Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo hawl gaar ah u qaabilsan, sida Ciidanka Nabadgelyada Waddooyinka, Baarista Dembiyada, Birmadka, Daraawiishta, Ilaalinta Canshuuraha iyo Ciidanka Wardoonka;

**"Xubin"** waa xubin kasta oo si sharci ah kaga tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Mudnaan"** waa kala sarreynta xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Mutaysi"** waa kasbashada dallacaad ama aqoon ay istaahisho xubin ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

**"Hakin"** waa ka joojin shaqo si ku meel gaar ah;

**"Gef"** waa fal kasta oo lagu mutaysan karo ganaax asbluubeed;

**"Dembi"** waa fal kasta oo gaarsiisan xukun maxkamadeed.

# QODOBKA 2aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeerayaa Xeerka Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug ee Soomaaliya;

# QODOBKA 3aad

## MABAADI'DA GUUD

1. Boolisku waa xoog nidaami ah oo u adeega dawladda iyo shacabka Galmudug, una taagan fulinta sharciga iyo ilaalinta nidaamka dawliga ah, ka mid noqoshadiisu waxa ay u furan tahay dadka reer Galmudug oo dhan rag iyo dumarba.

2. Astaanta ciidanka Booliska galmudug waa calaamaddaan buluuga ah oo wareega cagaarka ah leh labada xidigood iyo madaxa goodirka oo cadna dhexda ku heh.

3. Waxaa waajib ku ah booliska marka uu gudanayo hawsha iyo waajibaadkiisa in uu ilaaliyo mabaadi'da soosocota:
   - (b) Ixtiraamka ku Dhaqanka sharciga.
   - (t) Adkaynta iyo ilaalinta xuquuqda aadanaha si waafaqsan dastuurka Galmudug & kan dalka.
   - (j) U hoggaansanaanta nidaamka, halbeegyada xirfadeed iyo kan farsamo ee lagama maarmaanka u ah gudashada hawsha.
   - (x) gudashada waajibaadka si daahfuran oo waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale ee Galmudug.

# QODOBKA4aad

## Ujeeddada Xeerka

Si waafaqsan Dastuurka Dawlad-Gobaleedka Galmudug, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Xeerka Booliska Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo Qaab-dhismeedka Cusub ee Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, ujeedada xeerkan waa:

1. In lagu dhiso Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo leh qaab-dhismeed dhammaystiran iyo awoodaha iyo waajibaadka Ciidan Boolis.

2. In uu sugo waajibaadka, xuquuqaha, iyo mas'uuliyadaha xubnaha Ciidanka isla mar ahaantaasna ay ku salaysan yihiin shuruucda Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo kuwa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3. Sare u qaadista tayada iyo kartida Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug si ay ugu

adeegaan bulshada Galmudug iyo guud ahaan bulshada Soomaaliyeed;

4. In Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug loo dhiso si waafaqsan Nidaamka Booliska Cusub ee JFS;

## QODOBKA5aad

## Hoggaaminta Guud

1. Madaxweynaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug ayaa ah Taliyaha Guud ee Ciidamada Amniga Dawlad-Gobaleedka Galmudug sida ku cad Dastuurka Dawlad-Gobaleedka Galmudug.

2. Wasaaradda Amniga Gudaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug ayaa loo awood siiyay fulinta xeerkan. Wasiirka ayaana ah awoodda fulineed ee ugu sarraysa xeerkan, isla markaana waxa uu:

   (a) Madaxweynaha u soo jeedinayaa magacaabista iyo xil ka qaadista Taliyaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo Ku-Xigeennadiisa si waafaqsan Xeerkan iyo Dastuurka Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

   (b) Soo saarayaa Xeer nidaamiyaasha xeerkan, tilmaamo, hagayaal guud, iyo dejinta dhammaan qorsheyaasha iyo siyaasadaha amniga Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

   (c) Kor-joogteynayaa isla mar ahaantaasna hubinayaa in Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug ay u gudanayaan waajibaadkooda si waafaqsan Xeerkan iyo dhammaan shuruucda kale ee u degsan Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo JFS;

   (d) Dhammaan awoodaha kale ee lagu siiyay xeerarka iyo shuruucda kale ee Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo kuwa JFS, u fulinayaa si waafaqsan xeerkan;

## QODOBKA 6aad

## Gudashada Dhaarta

Xubin kasta oo ka mid noqonaysa Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug marka shaqada loo qaadanayo waxaa la marinayaa dhaartan:

”Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan naftayda u hibeeyo Difaaca iyo Dhawrista nidaamka dawladnimo, ilaalinta shacabka iyo dastuurka Galmudug, si ay ku jirto daacadnimo, ammaano, iyo inaan waqtigayga iyo awoodayda oo idil ku bixiyo inta aan noolahey gudashada waajibaadka dushayda saaran si waafaqsan sharciga Booliska Galmudug, dastuurka dawladda Galmudug, dastuurka dalka Soomaaliya iyo shuruucda kale ee dalka u taal, aniga oo fulinaya awaamirta ka soo baxda madaxdayda, in aan dadaalkayga meesha ugu sarraysa ku bixiyo fulintooda xitaa haddii ay keenayso naftayda inaan huro”

# QAYBTA II

## QAAB DHISMEEDKA

# CUTUBKA 2aad

## MAGACAABISTA, QORISTA & HAWLAHA

# QODOBKA 7aad

## Taliyaha & Taliye Xigeennada

1. Taliyaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxaa laga soo magacaabayaa sarreeyaasha iyo saraakiisha sare ee ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo haya shaqo joogto ah. Waxaana lagu magacaabayaa wareegto Madaxweyne marka uu Wasiirku soo jeediyo ayna ansixiyaan Golaha Wasiiradu si waafaqsan Qaab Dhismeedka Cusub Ee Ciidan ka Booliska Soomaaliyeed ee lagu hishiiyay 2016-kiiQodobkiisa 3aad.

2. Taliye Xigeennada Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxaa laga soo magacaabayaa saraakiisha ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo haya shaqo joogto ah. Waxaana lagu magacaabayaa wareegto Madaxweyne marka uu Wasiirka soo jeediyo ayna ansixiyaan Golaha Wasiiradu si waafaqsan Qaab Dhismeedka Cusub Ee Ciidan ka Booliska Soomaaliyeed ee lagu hishiiyay 2016-kiiQodobkiisa 3aad.

# QODOBKA8aad

## MaqaamkaXubnaha

1. Maqaamka xubin kasta waxaa lagu go'aamin doonaa waajibaadyada iyo xuquuqaha la xiriira darajadiisa. Waxa ayna ka billaabmaysaa marka darajada loo siiyo si sharci ah, waxa ayna ku egtahay marka uu lumiyodarajadaas.

2. Xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa ay ka kooban yihiin xubno ku jira shaqo joogta ah iyo xubnaha keydka ee hawlgabka ah.

3. Xubnaha ku jira shaqo joogta ah waxaa xeerinaya shuruudaha shaqada. Halka xaalad deg-deg ah ama dagaal waxaa dib loo hawl gelin karaa xubno horay looga dhigay hawlgab.

## QODOBKA 9aad

## Saraakiisha Ciidanka Booliska

1. Jagooyinka bannaan ama la samaynayo waxaa loo soo xuli doonaa xubnaha ka tirsan Booliska ama haddii loo baahdo si qoris ikhtiyaari ah oo loo marayo hannaan daahfuran oo ku salaysan caddaalad isla markaasna ay Wasaaraddu si hufan ku ogaysiisay dadweynaha Galmudug.

2. Qorista waxaa lagu salaynayaa dhammaan deegaannada Dawlad-GobaleedkaGalmudug.

3. Musharixiinta danaynaya xubinnamada Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waa in ay soo buuxiyaan shuruudaha looga baahanyahay.

4. Darajada Sarkaal waxaa lagu magacaabayaa wareegto Madaxweyne marka uu Wasiirka soo jeediyo si waafaqsan Xeerkan iyo Dastuurka Dawlad-GobaleedkaGalmudug.

## QODOBKA 10aad

## Kormeerayaasha Ciidanka Booliska

1. Kormeerayaasha Ciidanka Booliska waxaa laga soo xulayaa xubnaha Ciidanka Booliska ee Alifleyda ah, ama haddii loo baahdo shacabka Galmudug ee soo buuxiyay shuruudaha looga baahan yahay. Darajada Kormeere waxaa lagu magacaabayaa wareegto Taliye si waafaqsan Xeerkan.

2. Kuwa lagu soo xulay darajooyinka Alifleyda, gaar ahaan, waa in ay:

   (a) Dhammaysteen ugu yaraan labo sano oo shaqo joogta ah;
   (b) Qori karaan ayna akhrin karaan Luqadda Soomaaliga;
   (c) Leeyihiin diiwaan anshaxeed heer sare ah;
   (d) Maskax ahaan iyo muqaal ahaan u dhisanyihiin;
   (e) Leeyihiin akhlaaq wanaagsan oo daacadnimo kudheehantahay;
   (f) Leeyihiin karti hoggaamin wanaagsan;

## QODOBKA 11aad

## Alifleyda Ciidanka Booliska

1. Alifleyda Ciidanka Booliska waxaa laga soo xulayaa xubnaha Ciidanka Booliska ee Dableyda ah, ama haddii loo baahdo shacabka Galmudug ee soo buuxiyay shuruudaha looga baahan yahay.

2. Alifleyda laga soo xulayo xubnaha ka tirsan Ciidanka Booliska ee Dableyda ah waa in ay soo buuxiyaan shuruudaha iyo tilmaamaha lagu qeexay Qodobka 9aad farqaddiisa2aad.

3. Darajada Alifleyda waxaa lagu magacaabayaa wareegto Taliye si waafaqsanXeerkan.

## QODOBKA 12aad

## Dableyda Ciidanka Booliska

1. Dableyda Ciidanka Booliska waxaa si iskood ah looga soo xulayaa shacabka Galmudug oo soo buuxiya shuruudaha looga baahan yahay ee lagu qeexay ogaysiiska isqorista ama soo xulis toos ah oo ku salaysan mudnaan gaarah.

2. Dablayda loo soo xulo Ciidanka Booliska waa in ay soo buuxiyaan shuruudaha iyo tilmaamaha lagu qeexay Qodobka 9aad farqaddiisa2aad.

3. Taliyaha ayaa awood u leh in uu sameeyo qoris si loo buuxiyo boosaska bannaanada xilliyada lagu gudo jiro dhismaha Ciidanka si waafaqsanXeerkan

## QODOBKA13aad

## Waajibaadyada Guud

1. Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxaa ku waajib ah in uu:

(b) Difaaco/ilaaliyo amniga Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo kan bulshada kunool;
(t) Difaaco hay'adaha dawliga ah ee Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo kuwa JFS;
(j) Dhawro nidaamka dawliga ah iyo nabadgelyada;
(x) Ilaaliyo nafta, amniga shaqsiyadeed, iyo maalka shacabka iyo in xuquuqaha shaqsi ee uu sharcigu siiyay qofka u guto si xor ah oo aan khatar ku ahayn amniga Dawlad-Gobaeedka Galmudug iyo guud ahaan midka JFS;
(kh) Dhaqan geliyo shuruucda, xeerarka guud iyo kuwa gaarka ah ee hay'adaha dawliga ah iyo awaamiirta kale ee la xiriira danaha dhaqaale iyo siyaasadeed ee Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo kuwa JFS;
(d) Ka hortago, ka dabatago, iyo baarista dembiyada kana warbixiyo iyo in uu soo qabto eedaysane-yaasha.
(r) Baaro oo uu xakameeyo xadgudubyada shuruucda maaliyadeed ee Dawlad- Gobaleedka Galmudug iyo guud ahaan kuwa JFS.
(s) Guto waajibaadyadiisa Boolis ee kaga aaddan xuduudaha, hawada, iyo xeebaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug si waafaqsan Dastuurka Galmudug iyo kan JFS.
(sh) Ka hortagga falalka argagixisada iyo danbiyada abaabulan ee heer dal iyo dibad.
(dh) Dabargoynta maandooriyaha.
(c) Ilaaliyo anshaxa, akhlaaqda wanaagsan iyo dhaqanka suuban eebulshada.
(g) wacyi-geliyo isla markaana gaarsiiyo bulshada xogaha la xiriira ka hortagga danbiyada iyo qaabka ay bulshadu gacan uga geysan karto taageeridda Booliska.
(f) Fuliyo xukunnada garsoorka ama xukun iyo qaraar sharci oo kasta kaas oo ka soo baxa hey'addii shaqada ku lahayd.
(q) Fuliyo dhammaan waajibaadyada kale ee ilaalo iyo amni ee qaanuunku ugu baahan karo tillaabo Boolis

(k) Ilaalinta dhismayaasha iyo hey'adaha dawladda ee muhiimka ah iyo sidoo kale khayraadka dabiiciga ah ee Galmudug.
(l) ka hortagga iyo la dagaalanka tahriibkadadka.
(m) Ilaalinta iyo cayminta goobaha taariikhiga ah iyo goobaha dalxiiska.
(n) Dejinta nidaam iyo qaab lagu ilaaliyo duurjoogta Galmudug iyo arrimaha deegaanka.
(w) Hawl iyo waajibaad kasta oo kale oo sharcigan kuqeexan.

2. Ciidanka Booliska waxa ay bixiyaan gurmad iyo gargaar marka ay dhacdo masiibo dabiici oo guud iyo mid gaarahaaneed.

## QODOBKA 14aad

**Awoodda Ciidamada Booliska**

1. Si ciidanka Boolisku ay u fuliyaan waajibaadka iyo mas'uuliyadda ka saaran qodobada sharcigaan, waxa ay yeelanayaan awoodaha hoose si waafaqsan habka ciqaabta ama sharci kale oo lagu dhaqmo:
(b) Qabasho, cayrsasho iyo xirid.
(t) Xiridda wadooyinka, goobaha iyo fagaarayaasha guud.
(x) Qabashada Hubka sharci-darrada ah, walxaha qarxa iyo waxyaalaha qatartaah. (kh) su'aalo weydiin iyodabagal.
(d) Samaynta danbibaaris.
(r) raacdeynta iyo qabashadaeedeysanayaasha.
(s) soo saaris wicitaanimaansho.
(sh) kaalmo weydiisasho muwaadin kasta si loo xakameeyofal-dambiyeed. (dh) Adeegsiga xoogga ku haboon si waafaqsan xeerkaciqaabta.
(c) Awood kasta oo kale oo ku qeexan sharci dhaqangalah.
(g) waaranmaxkamadeed

## QODOBKA 15aad

**Waajibaadyada Garsoorka**

Si waafaqsan xeerarka iyo shuruucda garsoorka ee Galmudug iyo kuwa JFS, baarista iyo xakamaynta dembiga iyo dacwad u gudbinta waxaa fulin doona Ciidanka Booliska Dawlad- Gobaleedka Galmudug oo raacaya tilmaamaha Xeer Ilaaliyaha Guud ee Dawlad-Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 16aad

**Waajibaadyada Dhaqaalaha & Maaliyadda**

Si waafaqsan xeerarka iyo shuruucda maaliyadeed iyo dhaqaale ee Galmudug iyo kuwa JFS, gudashada waajiibaadyada la xiriira ilaalinta danaha maaliyadeed iyo dhaqaale ee Galmudug iyoJFS, Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waa in ay u hoggaansamaan tilmaamaha ay soo saaraan Wasiirada Dawlad-Gobaleedka Galmudug ee ku shaqada leh arimaha la xiriira Maaliyadda & Dhaqaalaha, haddii aysan ka hor-imaanayn tilmaamaha Wasiirka Amniga Gudaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug.

## QODOBKA 17aad

**Waajibaadyada Xaaladaha Gaar ah**

1. Marka ay dhacdo ama laga cabsi qabo isku-dhac, dagaal ama xaalad kale oo deg-deg ah oo daran, nooc kasta ha noqotee, Madaxweynaha marka uu arko soo jeedinta Wasiirka waxa uu amri karaa in Ciidanka Booliska ku hawl-galaan waajibaadyo ka dheeri ah kuwa lagu qeexay Qodobbada kore.
2. Xaaladaha noocaas oo kale ah, Madaxweynaha waxa uu amri karaa in si ku meel gaar ah loo kordhiyo tirada Ciidanka.
3. Xaaladaha dagaalka, Ciidamada Booliska waxa ay ka qayb qaadanayaan hawlgallada dagaalka si iskood ah ama iyaga oo garabsanaya Ciidamada Qalabsida eekale.

## QODOBKA 18aad

**Xiriirka Hay'adaha Amniga ee Heer Deegaan**

1. Qeybaha, saldhigyada iyo rugaha Ciidanka Booliska ee heer deegaan waxa ay u gudanayaan dhammaan waajibaadyadooda la xiriira sugidda amniga iyo nabadgelyada guud si waafaqsan tilmaamaha ay soo saaraan maamulada heer degmo iyo heer Gobal ee u idman nidaaminta dadweynaha.
2. Taliyaasha Qeybaha, saldhigyada iyo rugaha heer deegaan ee Ciidanka Booliska waa in wadashaqayni joogta ah ay la leeyihiin maamulladaas iyo in xiriir joogta ah uu kala dhaxeeyo hay'adaha kale ee amniga iyo garsoorka oo ka hawlgala deegaamadaas si ay u helaan markasta oo ay baahi timaaddo. Maamulada iyo hay'adaha heer degmo iyo Gobal waa in ay Taliyaasha ku wargeliyaan dhammaan xaaladaha saamayn ku yeelan kara waajibaadka Booliska.
3.

## CUTUBKA 3aad

## XILALKA & XUQUUQDA XUBNAHA CIIDANKA BOOLISKA

## QODOBKA 19aad

**Xilalka Xubnaha Ciidanka Booliska**

1. Dhammaan xubnaha Ciidanka Booliska waa in ay isku xilsaaraan gudashada waajibaadyada loogu igmaday sharcigan iyo fulinta tilmaamaha iyo awaamiirta qaanuuniga ah ee ay bixiyeen sarreeyaashooda iyo madaxda loo idmaday.

2. Xubnaha Ciidan Booliska waxaa loo tixgelin karaa in ay si joogta ah ugu jiraan heeganka, iyo in ay joogaan meel kasta xilli kasta si ay u gutaan waajibaadka looxilsaaray.

3. Xubnaha Ciidanka Booliska, waxa ay ka mid yihiin Ciidamada Qalabka Sida, waxaana qabanaya

qawaaniinta ciqaabta ciidamada ee jira markaas si waafaqsan qodobada xeerkan.

4. Inta lagu jiro xaaladda degdegga ah, howlgabnimada xubin ka mid ah Ciidanka Booliska ee ku aaddan shaqada, waxaa, iyada oo aan laga horimaanayn wax qodobo ah oo ku saabsan sharci ama qaanuun kasta, ay ku xiran tahay oggolaanshahaTaliyaha.

## QODOBKA 20aad

## Mamnuucidda Fulinta Hawlo ka Baxsan Sharciga

1. Xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug kuma lug yeelan karaan hawlo aan ahayn halwaha sida sharciga ah looguxilsaaray.

2. Waxaa ka mamnuuc ah Xubnaha Ciidanka Booliska in ay qabtaan shaqo kale oo kasta, mushaari ah ama aan ahayn, oo ka baxsan shaqooyinka loogu igmaday xeerkan, illaa ay si rasmi ah oo waafaqsan quunuunka ugu baahan yihiin mas'uuliiyiinta leh awooddaas in sidaas lasameeyo.

## QODOBKA 21aad

## Mamnuucidda Shaacinta Xogaha Xafiiska

1. Waxaa ka mamnuuc ah Xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug in ay shaaciyaan sinnaba ama ay ogaysiiyaan shaqsiyaad aan loo fasixin xog sir ah oo ay heleen inta ay ku gudo jireen waajibaadkooda, ama haddii kale si sir ah loogugudbiyay.

2. Xubin kasta oo ka mid ah Ciidanka Booliska ee ku xadgudubta mamnuucidda kor lagu xusay, waxaa loo gudbinayaa Maxkamada Ciidamada Qalabka Sida si ay go,aan uga gaarto.

## QODOBKA 22aad

## Mushaarka & Gunnooyinka

Mushaarka iyo gunnooyinka xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa uula mid noqonayaa sida xubnaha kale ee Ciidamada Qalabka Sida ee JFS, marka laga reebo wixii gunno gaar ah oo loogu talagalay noocyada wajibaadka ee cayiman.

## CUTUBKA 4aad

## QAAB-DHISMEEDKA

## QODOBKA23aad

### Qaab-Dhismeedka Ciidanka Booliska

1. Si waafaqsan dastuurka Galmudug, Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa uuka koobanyahay:

(a) Taliska Ciidanka Booliska waxaa uu ka koobanyahay;

(i) Taliye

(i) TaliyeKu-Xigeenno

(i) Hoggaanno

(b) Qaybo iyo waaxyo si toos ah u hoostagataliska

(c) Saldhigyo iyoRugo

(d) Laamo

(d) Ciidanka Booliska gaarkaah

(i) Ciidanka DaraawiishtaGalmudug

(ii) Ciidanka BirmidkaGalmudug

(iii) Ciidanka IlaaladaXeebaha Galmudug

(iv) Ciidanka gaarka ah ee la dagaalankaargagixisada

(e) Ciidanka Booliska ee farsamada iyo taqasususka gaarka ahleh

(i) Ciidanka Ilaalada CanshuurahaGalmudug

(ii) Hogaanka Baarista DembiyadaGalmudug

(iii) Ciidanka Nabadgelyada WaddooyinkaGalmudug

(iv) CiidankaDabdamiska

(v) Qeybta isgaarsiintabooliska
(vi) tababarada
(iiv) taakulaynta sida (gaadiidka, kaydinta dhexe, Caafimaadka iyodhismaha booliska)

2. Si waafaqsan Qaab-Dhismeedka Amniga Qaranka, Wasiirka waxa uuxeernidaamiye gaar ah ka soosaarayaa:

(a) Qaabka Booliska Cusub eeGalmudug

(b) Qorshaha Horumarinta Booliska Dawlad-GobaleedkaGalmudug.

## QODOBKA 24aad

## Awoodaha & Mas'uuliyadaha Taliyaha

1. Taliyaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug isaga oo dhawraya Xeerkan iyo Xeernidaamiyaashiisa, isla markaasna ah mas'uulka ugu sarreeya hoggaaminta iyo maamulka Ciidanka Booliska, waxaa awoodaha & mas'uuliyadaha Taliyuhu ayyihiin:

(a) Horumarinta, isku xirka, iyo hawlgelinta Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

(b) Qorsheynta iyo jaangooynta tirada Ciidanka Booliska hadba sida baahida shaqo tahay;

(c) In uu si joogtaa ah ugu soo gudbiyaa Wasiirka dhammaan qorsheyaasha, siyaasadaha, iyo barnaamijyada lagu horumarinayo Ciidanka Booliska iyo dhammaan warbixinnada muhiimka u ah habsami u socodka hawlaha Booliska. Sidoo kale, Taliyaha waxa uuu soo gudbinayaa Wasiirka dhammaan xogaha aad muhiimka ugu ah si guud ama si gaar ahba amniga Dawlad-Gobaleedka Galmudug;

(d) Soo-jeedinta dalacaadda darajooyinka oo uu Wasiirka u soo gudbinaayo wixii ka sareeya xidigle, halka Taliyaha uu awood u leeyahay dalaacadda derjooyinka ka hooseeyaxidigle;

2. Taliyaha waxa uukor-joogtaynayaa isla markaasna uu si dhow ula soconayaa barnaamijyada tababarrada CiidankaBooliska.

3. Taliyaha waxa uuawood u leeyahay in uu fuliyo dhammaan awoodaha sharciga iyo xeerarka lagu siiyay ee la xiriira arimaha bixinta abaalmarinnada iyoanshaxmarinta.

4. Taliyaha waxa uuawood kasta ee lagu xusay qaybta kore ee ka mid ah awoodihiisa u wakiilan karaa ku xigeenadiisa ama Saraakiisha kale eeBooliiska.

## QODOBKA 25aad

**Awoodaha & Hawlaha Taliye Xigeennada**

1. Taliye Xigeennada Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa ay ku caawinayaan Taliyaha in uu si hufan u qabto hawlahiisa shaqo iyo in ay fuliyaan dhammaan wajibaadyada kale ee loo igmankaro.

2. Haddii Taliyaha uu ka maqan yahay dalka ama caqabad kale la soo gudbuunaato, waxaa awoodihiisa & mas'uuliyadiisa la wareegaya Taliye Ku-Xigeenka Koowaad isaga oo xaqiijinaya in tilmaamaha uu bixiyay Taliyaha iyo dhammaan hawlaha Ciidanka Booliska loo fuliyo si habsami leh. Sidoo kale haddii Taliye Ku-Xigeenka Koowaad ay sidaas oo kale lasoo gudboonaato hawlahaas oo dhan waxaa qabanaya Taliye Ku-Xigeenka Labaad,ama ay dhacdo in Taliye Ku-Xigeenka Labaadna uusan joogin waxaa hawlahaas qabanaya xafiiska hogaanka ciidankaBooliska.

# CUTUBKA 5aad

## SHURUUDAHA QORISTA CIIDANKA

## QODOBKA26aad

**Soo QoristaXubnaha**

Soo qorsita shaqsiyaadka ka mid noqonaya xubnaha Ciidan Booliska waxaa lagu soo xulayaa si waafaqsan xeerkan iyo xeernidaamiyaashiisa. Hadii ay lagama maarmaan noqoto, markasaraakiil la qorayo, waxaa la soo saaraayaa ogaysiis loogu tartamayo qoristaas oo ay ku caddahay:

(a) Nooca tartanka iyo shuruudaha loo baahan yahay iyo weliba shuruucda looga qaybgalayo;

(b) Qaabka loo hubinayo soo buuxinta shuruudaha la iskaga baahanyahay;

(c) Iyo shuruud kasta oo kale ee la xiriirtatartankaas;

## QODOBKA 27aad

**Xulista Xubnaha**

Xulista musharaxiinta u dalacaya Sarkaal, Kormeere, Alifley, ama diiwaangelinteeda waxaa samayn kara oo kaliya Taliyaha Ciidanka Booliska oo ay caawinayaan guddi qiimayn ee Wasiirku uu soo magacaabo waqti ka waqti.

## QODOBKA 28aad

**Imtixaanka Kama Dambaysta ah**

1. Layli Sarkaal kasta ee laga soo xulay rayidka ee sabab kasta awgeed ku guul daraysta in uu ka gudbo imtixiaanka kama dambaysta ah waxaa laga saari karaaCiidanka.

2. Layli Sarkaal kasta ee laga soo xulay darjajooyin Ciidanka Booliska ee sabab kasta awgeed ku guul daraysta in uu ka gudbo imtixiaanka kama dambaysta ah dhammaadka koorso kasta waxa uusii ahaanayaa darajadii uu ahaa ka hor inta aan loo qaadan Layli Sarkaal.

## QODOBKA 29aad

**Uddalacidda Darajo Sarkaal iyo Qiimayn**

Alifle kasta ee ka soo gudba imtixaanka kama dambaysta ah kadib marka uu dhammaysto kooraska waxaa loo dallacsiin karaa darajo Sarkaal

## QODOBKA 30aad

**Kala Sarraynta Dallacsiin Sarkaal**

Iyada oo aan laga tagayn mabda'a guud ee kala sarraynta, marka loo eegayo tartan imtixaan waxaa kala saraynta ugu habboon lagu salayn doonaa buundooyinka kama dambaysta ah ee Sarkaal kasta uu helo dhammaadka koorsada.

# CUTUBKA 6aad

## SHAQOOYINKA & HAWLAHA CIIDANKA

## QODOBKA 31aad

**Shaqooyinka Joogtada ah**

Shaqooyinka joogtada ah ee Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waa:

(a) Shaqo kujiris

(b) Fasax kumaqnaan

(c) Shaqo lahakiyay

## QODOBKA 32aad

## Shaqo Ku Jiris

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo diyaar u ah shaqo waqti walba waxaa loo aqoonsanayaa shaqo kujiris.

2. Xubin kasta oo shaqo ku jirta waa inay tahay mid jir ahaan u diyaarsan shaqo shuruud la'aanah.

3. Ku habboonaanta shaqo ku jirista waxaa si waqtiyaysan u hubinaya Taliyaha Ciidanka Booliska ama cidda uga wakiilkaah.

## QODOBKA 33aad

## Fasax Ku Maqnaan

1. Xubin kasta oo si ku meel gaar ah looga dhaafay inay shaqo ku jirto oo la xiriira mid ka mid ah sababaha soo socda waxaa loo arkayaa inay fasax ku maqantahay:

    (a) Maxbuusdagaal;

    (b) Jirro fudud oo ka dhalatay shaqadaawgeed;

    (c) Jirro fudud oo aan loo qaadan garin shaqogab;

    (d) Sababo khaas ah fasax ku maqnaansho waxaa lagubixinayaa

        (i) Si sharci ah haddii ay dhacdo sida ku cad xarafka (a) eekore;

        (ii) Si codsi ama amar ah kadib baaritaanka caafimaad ee waajibka ku ah xarfaha (b) iyo(c);

        (iii) Si codsi ah oo khuseeya oo kaliya baahiyaha hawlaha xarafka(d).

2. Ka hor, inta aan xubin loo dirin fasax sababa jira awgeed, waa in la siiyaa muddo fasaxeedka isku gaar-gaaray ee u harsan weli haddii ayjiraan.

3. Fasax ku maqnaanshaha waxa uuka billaabmayaa taariikhda lagu ogaaladay fasaxa, marka laga reebo fasax maxbuus dagaal oo ka billaambaysa taariikhda laqabtay.

## QODOBKA 34aad

**Shaqo La Hakiyay**

1. Waxaa shaqada la hakinkaraa:

   (a) Sababo taxaddarawgood;

   (b) Sababo anshax marineedawgood;

   (c) Marka uu dhaco xukundembi;

2. Xarfaha (a) iyo (b) ee kore ayaa loo adeegsan doonaa haddii xubinta lagu eedeeyay xaqiiqooyin uu ku mutaysan karo ciqaab ama talaabo anshax marineed marka xubinta loo jarowaaran.

3. Haddii go'aan kama dambays ah laga gaaro dacwadaha ciqaabta laguna soo gabagabeeyo in uusan jirin wax dambi ah oo la galay ama eedaysanuhu uu san gelin, shaqo hakinta waa lagalanoqonayaa.

4. Shaqo ka hakinta sidoo kale waa lagala noqonayaa markii wax ciqaab ah ama talaabo anshax marin ah aan lagu qaadin xubinta muddo macquul ah gudaheed ama marka aysan jirin ciqaab ku soo rogeysa dacwadan ookale.

5. Marka xubin shaqada laga hakiyo sababo anshax marineed awgood, waa in lagu wargeliyaa eedaymaha loo haysto iyo sababta shaqada loogahakiyay.

6. Shaqo hakinta waxa ay ku xiran tahay ansixinta TaliyahaCiidanka, halka kiisaska Saraakiisha uu Taliyaha dhagaysan doono talooyinka Guddiga Anshax Marinta marka hore inta uusan ansixin shaqo hakin Sarkaal. Warqadda shaqo hakinta waa in ay ku cad yihiin sababaha loogu baahday shaqohakinta.

7. Xubin kasta oo lagu sameeyay shaqo hakin waxa uuxaq u leeyahay nusmushaar.

## QODOBKA 35aad

**Joojinta Shaqooyinka Joogtada ah**

1. Xubin waxaa looga joojin karaa shaqooyinka joogtada ah mid ka mid ah sababaha soo socdaawgeed:

   (a) Da’ada;

   (b) Jirro;

   (c) Karti la’aanta la xiriirta darajada uuhayo;

   (d) Codsi rukhsadeed

(e) Hawlgabnimo lagu qasbanaaday;
(f) Ku Sakhraama si ula kac ah

2. Marka sarkaal laga joojinayo shaqooyinka joogtada ah Madaxweynaha ayaa ku soo saaraya wareegto, kadib soo jeedinta Wasiirka marka uu dhagaysto talooyinkaTaliyaha.

3. Da'ada rasmiga ah ee lagu xaddidayo hawlgabnimo waxaa lagu soo saarayaa xeernidaamiye gaar ah, inta ka horeysa waxaa loo cuskanayaa xeerarka iyo shuruucdaka jira JFS ee laxiriira.

4. Xubintii si joogta ah u gabta in shaqada ku jirto ama aan ku soo kaban muddada ugu badan ee loo cayimay fasax ku maqnaansho sida lagu qeexay qodobada kore ee xeerkan waxaa laga joojin doonaa shaqooyinka joogtada ah. Waxaa sidaas oo kale la mid ah xubintii lagu helo in aysan karin fulinta waajibaadkeeda darajo anshax ahaan iyo/ama xirfadahaanba.

5. Xubin kasta oo Ciidanka Booliska kamid ah oo shaqada looga joojiyay sababaha lagu xusay qodobada kore, haddii ay suulaan sababuhu Maxkamadna aysan xukumin waxaa lagu soo celin karaa shaqadeeda.

6. Xubintii shaqada looga joojiyo sakhraanimo owgeed maxkamadda ayaa loo gudbiniyaa iyada ayaana go'aan ka gaaraysa.

# CUTUBKA 7aad
# DALLACAADDA

## QODOBKA 36aad
## Shuruudaha Dallacaadda

1. Xubinta la dallacsiinayo waa in ay caafimaad qabto, qaadatay tababarka looga baahan yahay, leedahay anshax akhlaaqeed, indheer garadnimo, tacliin & aqoon mehradeedku habboon waajibaadka & maqaamka darajadacusub.

2. Astaamahaan oo dhan waxaa laga tixraacayaa galtirsiga iyo warbixinnada lix biloodlaha iyo sannadlaha ah ee qiimeyntaxubinta.

## QODOBKA 37aad
## Noocyada Dallacaadda

1. Dallacaadda waxaa lagu bixinayaa u bislaansho, mudnaanta darajada, mutaysi &mudnaangaarahaaneed.

2. Taliyaha Ciidanka Booliska waxa uudiyaarinayaa liiska saraakiisha u bisildallacaadda.

3. Marka ay habboon tahay, Taliyaha Ciidanka Booliskuwaxa uudiyaarin karaa liis ay ku qoran yihiin tirada Kormeerayaasha, Alifleyda & Dableyda loo tixgelin karo dallacaad, iyada oo la raacayo jagooyinka ka bannaan ku talagalkadarajooyinka.

## QODOBKA38aad

**MudnaanDallacaad**

1. Xubinta mudan in la dallacsiinayo waa in ay leedahay shuruudaha ku xusan Qodobka 35aad waana in ay kaga jiraan liiska mudnaanta tirada jagooyinka u bannaan dallacaadda.

2. Dallacaadda mudnaanta & u bislaanshaha waxaa loo kala horreynayaa sida ay ugu kala horreeyaan xubnaha dallacaya liiskoodaCiidan.

## QODOBKA 39aad

**Muteysi Dallacaad**

1. Xubin kasta oo leh shuruudaha ku xusan qodobka 35aad oo ku jirta liiska mutaysiga dallacaadda ee jagooyinka u bannaan dallacaadda ama leh shuruudo gaar ahaaneed, waxaa lagu dallacsiin karaa mutaysi iyada oo aan la eeginmudnaanta.

2. Dallacaadda muteysiga waxaa loo sameeyaa sida ay magacyada ugu soo kalahorreeyaan liiska qiimaynta mutaysiga ama iyada oo la tixgelinayo dhibcihii imtixaanka laguhelay.

## QODOBKA 40aad

**Mutaysiga Dallaacaad Gaar ah**

1. Xubin kasta oo u qabata Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug amaQaranka guud ahaan shaqo qiimo gaar ah leh ama muteysi gaar ah leh waxaa lagu dallacsiin karaa mutaysi gaarahaaneed.

2. Inta ay shaqada hayso xubintu, waxa ay heli kartaa dallacaad mutaysi gaar ahaaneedhal mar & kabadan.

3. Xubinta ku dallacday mutaysi gaar ahaaneed waxa ay roolka kaga hor maraysaa kuwa la darajada ah ee ku dallacay u bislaansho, mudnaanta amamutaysi.

## QODOBKA 41aad

**Liiska Mudnaanta**

Dallacaadda awgeed, darajada & kala horreynta mudnaanta/u bislaanshaha xubnaha darajo kasta waa in lagu qoraa roolalka yaalla Taliska Ciidanka Booliska.

## QODOBKA42aad

## GuddigaQiimaynta

1. Marka la samaynayo mudnaan dallacaad ama mutaysi ee saraakiisha, Wasiirkaayaa magacaabaya guddi qiimayn ku habboon oo ka talo bixiya dallacaaddaXubnaha.

2. Marka la samaynayo dallacaad mudnaan ama mutaysi ee dhammaan darajooyinkakale, Taliyaha Ciidanka ayaa magacaabaya guddi qiimayneed oo ka talo bixiya dallacaadda Xubnaha.

3. Go'aanka guddiga qiimeynta waa kama dambeys, waana in ay joogaan uguyaraan seddex meelood labo meel xubnahaguddiga.

4. Guddiga qiimayntu waxa ay ka koobnaan karaan ugu yaraan hal sarkaal oo sare & saraakiil kale oo ka sarreeya xagga darajada xubinta laqiimaynayo.

## QODOBKA 43aad

## Qiimaynta Dallacaadda

1. Si loogu qiimeeyo xubinta dallacaadda mudnaaneed, xubintu waa in ay darajada ay joogtoo sidatay ugu yaraan labo (2) sano, waa in ay ka qaybgashay koorso marka loo baahan yahay, helaana natiijo u qalanta dhammaadka koorsada. Dallacaadda mutaysiga ah, wakhtiga kor ku xusan waxaa hal (1) sano ka dhigi karaWasiirka.

2. Xubin kasta oo ay ku oogan tahay ama loo haysto dacwad ciqaabeed ama midasluubeed ama ku jirta shaqo joojin looma qiimayn karo dallacaad mana la dallacsiinkaro.

3. Guddiga qiimayntu waxa ay ra'yigooda dhiibanayaan iyaga oo tixraacaya qaraarka ayka helaan galtirsiga & warbixinnada qiimeynta xilliyeysan & haddii ay jiraan natiijooyin imtixaanno.

4. Guddigu waxa uura'yigiisa ku saabsan dallacaadda mudnaaneed u dhiibanayaa isaga oo sheegaya in ay xubinta la qiimaynayo ku habboon tahay dallacaad & in kale, xubintii ka heshaa ugu yaraan kala bar codadka ay bixiyeen xubnaha guddiga waxaa loo tixgelinayaa in uu ku habboon yahaydallacaad.

5. Xagga dallacaadda mutaysiga, xubin kasta oo heshaa ugu yaraan seddex meelood labo meel min codadka la bixiyey waxaa loo tixgelinayaa in ay dallacaad ku habboon tahay, haddii ay la noqoto Taliyaha Ciidanka Booliska, xubnihii la caddeeyo in ay ku habboon yihiin dallacaad waxaa la marsiin karaa koorso laguqiimaynayo.

6. Guddigu waxa uusiinayaa xubin kasta oo loo xulay in ay ku habboon tahay dallacsiin dhibco munaasib ah; si loogu kala saaro kala horrayntooda mutaysiga iyada oo haddii dhibcuhu isku mid noqdaan, tixgelinta hore la siinayo xubinta ugu mudan xaggaroolka.

7. Xubnaha la caddeeyey in aysan ku habboonayn dallacaad waa in lagu qoraa liiska sidaay roolka ugu kalahorreeyaan.

8. Dhibcaha mutaysiga ee ku tilmaaman meeriska (6) waxaa la bixinayaa kaddib markiila tixgeliyo mid kasta oo ka mid ah arrimaha soosocda:

   (a) Tayada anshaxa, akhlaaqda & dhismahajirka;

   (b) Tayada aqoon meheradeedka sida uu ahaa muddadii shaqo haynta, iyada oo si gaar ah loo tixgelinayo awoodda hoggaaminta ama astaamaha kale ee askerinnimada;

   (c) Tayada in-dheer-garadnimada &aqoonta;

9. Xubnaha ku jira liiska ku habboonaanta dallacaadda & kala horraynta mutaysiga ee uu oggolaadey Wasiirka ama Taliyaha Ciidanku sida ay u kala leeyihiin, waxaadallacasiinaya cidda awoodda u leh iyada oo la raacayo sharciga Ciidanka Booliska, xubnaha kale ee loo soocay in aysan ku habboonayn dallacaad waa laga qeybgelin karaa qiimaynkale.

10. Caddaynta ku habboonaanta dallacaadda & ku daridda liiska kala horrayntamutaysiga ma abuureyso xaq lagu helo dallacaad deg degah.

11. Taliyaha Ciidanka Booliska ayaa leh awoodda joojinta u qiimeyn dallacaad xubintaay khuseeyaan xaaladaha ku tilmaaman meeriska 2 eeQodobkan.

12. Xubnaha aan loo qiimayn ama loo dallacsiin sababaha ku tilmaaman meerisyada 2 & 11 ee Qodobkan waxaa loo qiimayn karaa dallacaad ka dib marka sababihii is hortaagay qiimaynta dallacaadda ay dhammaadaan, qiimayntaas waxaa loo tixgelinayaa in mar kale lala sameeyey xubnihii isku mar hore loo qiimeeyey haddii dallacaaddu tahay mid mudnaaneed.

## CUTUBKA 8aad

### FASAXA, MUSHAARKA, & MAQAAMKA XUBNAHA

## QODOBKA 44aad

Mushaarka

1. Haddii aan si kale loogu sheegin xeerkan ama shuruucda kale ee u degsan Dawlad- Gobaleedka Galmudug, xubin kasta oo shaqada ku jirta, marka ay qaadato fasaxa caadiga ah ee sannadlaha ah, fasax dhalmo, fasax bukaan ama nasasho caafimaad waxa ay xaq u leedahay mushaar

dhammeystiran iyo dhammaan gunnooyinka uwaajibay.

2. Mushaarka & gunnooyinka waa laga joojinayaa xubin kastaoo:

   (a) Shaqa haynta uga joogsata sababkasta;

   (b) Ku daahda fasax sharci darro ah in ka badan 48 saacadood;

   (c) Loo oggolaaday fasax aan lacag ahayn sababo shaqsiah;

   (d) Lagu caddeeyey in uufakaday;

## QODOBKA45aad

## Goynta & Dhimista

1. Goynta & dhimista xuquuqda lacageed ee la siinayo xubnaha ka tirsan CiidankaBooliska waxaa lagu samayn karaa sababahan ookaliya:

   (a) Ganaax ku yimid gefasluubeed;

   (b) Amar ay maxkamadibixisay;

   (c) Amar shaqo ka joojinawgeed;

   (d) Waxyeellayn & lumin alaab/hanti Dawladeed amadadweyne;

   (e) Fasax aan caadi ahayn oo loo qaatay sababo waxbarasho iyo caafimaad darrosida uu dhigayoxeerkan;

2. Marka laga reebo shaqo ka joojinta oo mushaarka & gunnooyinka cayiman joogtadana ah la bixinayo kala bar, isugeynta guud ee goynta & hoos u dhigga mushaaradu ma dhaafi karaan xuduudaha uu dhigayoxeerkan.

## QODOBKA 46aad

## Geeri, Naafo, Dhaawac & Caafimaad Darro

Taliyaha Ciidanka Boliisku, markuu dhegaysto ra'yiga guddi caafimaad, waxa uu go'aaminayaa in geerida, naafanimada, caafimaad darrada ama dhaawaca xubinta uu ku yimid sabab shaqo ama siyaabokale.

## QODOBKA 47aad

## Fasax Caadi ah

1. Iyada oo ay ku xiran tahay baahida shaqo, xubin kasta oo Ciidanka ka tirsan waxa uuxaq u yeelanayaa fasax sannadeed lacag leh oo caadi ah, 30 maalmood oo shaqo sannadkiiba.

2. Taliyaha Ciidanka Booliska ama taliyaha fadhiga ay xubintu ka tirsan tahay waxa uumar kasta u yeeri karaa xubinta fasaxa kujirta.

## QODOBKA 48aad

## Xubnaha Waxbarasho ugu Maqan Dalka Dibaddiisa

1. Xubin kasta oo Dalka dibeddiisa wax ku baranaysa iyada oo kharashka waxbarashada ay bixinayso Dawlad-Gobaleedka Galmudug, Dawladda Federaalka, hay'ad maxalli ah, Dawlad ajnebi ah ama urur caalami ah waa in ay saxiixdaa dammaanad ah in aysan ka tageynin shaqada Ciidanka Booliska muddada ku cayimandammaanad-qaadka.

2. Xubintii jebisa shuruudihii dammaanadda waxaa khasab ku noqonaysa in ay bixiso dhammaan kharashaadkii loo galay waxbarashadiisa dibedda, kuna bixiso si waafaqsan nidaamka sharciga ah ee habka madanigaah.

3. Xubin kasta oo ka qayb gelaysa waxbarashada dibedda ah ee ku xusan meeriska 1aad ee qodobkan ma yeelaynayso mushaaro & gunno aan ahayn gunno nafaqo oo la siinayo Xaaska & Carruurta haddii aanay waxbarashadu ahayn meheraddaBooliska.

## QODOBKA 49aad

## Fasax Ururay

1. Iyada oo ku xiran baahida shaqo, xubnaha Ciidanka Boolisku waa in ay qaataanfasaxooda sannadlaha ah.

2. Iyada oo aan wax loo dhimin fasax hore oo si sharci ah loo mutaystay, waxaareebban kaydinta fasax ka badan 2bilood.

3. Fasaxa sannadlaha ah ee uaruurayxubnaha waxaa loogu beddeli karaa gunno uu cayimayoWasiirku marka uu soo gudbiyo Taliyuhu.

## QODOBKA 50aad

## Ku Daahid Fasax

Xubin kasta oo ugu daahda fasax sabab aan macquul ahayn awgeed, iyada oo aan wax loo dhimin wixii ciqaab gef asluubeed ah oo laga qaadi karo, waxaa loo qaadanayaa in ay ku jirtay fasax aan caadi ahayn

oo lacag la'aaneed dhammaan muddada u dhexeysa dhammaadka fasaxa iyo taariikhda uu ku soo laabtayshaqada.

## QODOBKA 51aad

**Awoodda Fasax Bixinta**

1. Madaxweynaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug ayaa awood u leh in uu siiyo Taliyaha Ciidanka Booliska fasaxyada nooc kasta leh ee sharciga ama xeerkani sheegayo isagaoo dhegeystay Wasiirka AmnigaGudaha.

2. Taliyaha Ciidanka Booliska ayaa awood u leh in uu fasaxyada nooc kasta leh ee sharciga ama xeerkan ku xusan siiyo xubnaha kale ee Ciidanka Booliska, isaga oo la socodsiinaya Wasiirka fasax kasta oo la siinayosaraakiisha.

## QODOBKA 52aad

**Maqaamka Sharciyadeed ee Xubnaha Fasaxa ah**

Xubnaha ku jira fasax waxaa qabanaya waajibaad asluubeed & kuwa la xiriira maqaamkooda sharciyeed.

## QODOBKA 53aad

**Diiwaan Gelinta Fasaxa**

Fasax kasta oo la bixiyo waxaa lagu qorayaa galtirsiga xubinta uu khuseeyo.

## QODOBKA 54aad

**Shahaadada Shaqo Fariisinta**

1. Marka shaqada laga fariisinayo xubin, waxaa la siinayaa warqad ama xaashi tilmaamaysa sababaha shaqo ka fariisinta & muddada ay shaqadahaysay.

2. Marka ay shaqada ka fariisanayso xubin, xubintaas waa in ay wareejisaa dhammaan hubka, rasaasta, qalab & alaab kasta oo Dawladeed oo ay hayso ama mas'uul katahay.

# QAYBTA III

## ANSHAXA

# CUTUBKA 9aad

## MABAADI'IDA GUUD EE GEFAF ASLUUBEEDKA IYO CIQAABTA

# QODOBKA 55aad

## Faritaannada Sharciyada & Xeerarka Kale

Iyada oo aan wax loo dhimin ciqaabaha ka sii culus ee ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ama Sharci kasta oo kale ee u degsan Dawlad-Gobaleedka Galmudug, ku xadgudubka faritaannada xeerkan waxaa laga qaadayaa tallaabo asluubeed iyada oo la raacayo habka & nidaamka uu qorayo isla xeerkan.

# QODOBKA 56aad

## Xeerarka Guud ee La Xiriira Qaadista Gefaf Asluubeedka

1. Waa in la sugaa caddaalad & eex la'aan marka la qaadayo gefaf asluubeed, si taasi u suurtogasho, xubinta qaadaysa dacwad asluubeed waa in ay tixgelisaa dhammaanfalalka & duruufaha la xiriira gefka. Gefaha waa in la siiyo fursad lagu dhegeysto uuna isku daafaco.

2. Marka gefafka ciqaab la saarayo waa in la tixgeliyaa akhlaaqdii hore & waayoaragnimada shaqo & eelka gefku reebayo ama keenikaray.

3. Xubinna xubin ka darajo hooseysa ma saari karto ciqaab ka duwan midda xeerkani qorayo ama mid uu awooddeeda leedahay xubin ka darajosaraysa

# QODOBKA 57aad

## Waajibnimada Wax Ka Qabashada Gef Asluubeedka

Xubin kasta ee ka tirsan Ciidanka Booliska oo goob joog ka ah marka xubin ka darajo yari gelayso ama laga yaabo in ay gasho gef kasta oo asluubeed waa in ay tallaabo ka qaadaa haddii ay awood u leedahay, joojisaa una sheegtaa arrinta xubinta xagga darajada uga mudan fadhiga uu ka tirsan yahay gefuhu ama haddii taasi aanay suurtogal ahayn xubinta ugu dhow ee ka tirsan Ciidanka Booliska kana mudan isaga xaggadarajada.

## QODOBKA 58aad

### Tallaabooyinka Xakamaynta Hordhaca ah

Xubin kasta oo ogaata in xubin ka darajo hooseysa ay gashay gef asluubeed waxa ay amri kartaa in gefaha la qabto, waana in ay iyada oo aan sabab la'aan ula daahin horgeysaa ama amartaa in la horgeeyo xubinta awoodda u leh in ay tallaabo asluubeed ka qaado gefaha, xubinta la horgeeyay gefaha waxa ay amri kartaa in lagu hayo meesha loogutalagalay.

## QODOBKA 59aad

### Ganaaxyada Laga Jarayo Mushaarka

Ganaax kasta oo ku yimid gef asluubeed waxaa laga jarayaa mushaar bileedka xubinta la ganaaxay, inta laga jarayana waxaa lagu cayimayaa go'aanka ganaax iyada oo aan lagu xadgudbin sharciga ama xeerkan.

## QODOBKA 60aad

### Qaanbixinta ama Waxyeelooyin Kale ama Lumin Mushaar

Haddii aan si ka duwan sharci kale u tilmaamin, xubin kasta ee ka tirsan Ciidanka Booliska oo iibisa, rahanta, dayacda, qaadata si ula kac ama taxaddar darro ku waxyeelleysa hub, rasaas, lebbis qalab ama alaabo/hanti kale oo ay Dawladdu leedahay ama dadweynuhu leeyihiin oo lagu aaminay ama uu gacanta ku hayay, xubintaas waxaa la saarayaa magdhowga dhammaan ama qaar ka mid khasaarihii ama lumistii ay geysatay iyada oo laga jarayo mushaarkeeda ama xaqa ay si kasta Dawladda ugu yeelato qadar u dhigma qiimaha hantida kumaqan.

# CUTUBKA 10aad

# KARTI-U-YEELASHADA IYO NIDAAMKA

## QODOBKA 61aad

### Karti-u-Yeelashada

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa ay awood u leedahyay in ay baarto gef kasta oo asluubeed oo ay gasho xubin ka darajahooseysa.

2. Xubin kasta oo taliye ama taliye ku sime ka ah fadhiyada Booliskuwaxa ay awood u leedahay in ay baarto gef kasta oo asluubeed oo lagu sheegay xeerkan laguna soo oogay xubin ka tirsanfadhigiisa.

## QODOBKA 62aad

**Nidaamka Dhagaysiga Gef Asluubeedka**

1. Xubin kasta oo qaadaysa gef asluubeed waa in ay gefaha u bandhigtaa waxa lagu eedaynayo, dhegeysataana difaaciisa, ugu dambayntiina gaartaa go'aan qoraal ah, haddii ay ugu muuqato in xubintu gefku ku cad yahay waxa ay ku xukumaysaa ciqaab u dhiganta gefkiisa, haddii ay awooddiisa tahay, haddii kale waxa ay arrinta u gudbineysaa cidda awoodda u leh saarista ciqaabtaas iyada oo raacinaysa soo jeedinteeda, marinaysana cidda ku habboon xagga jaranjarada kala sarreyntatoosan.

2. Haddii gefaha gefku ku caddaado, go'aankii la gaaray markii dacwadii dhammaatay, ciqaabta la saarayo & arrimaha la xiriira waa in sarkaalka gefka ama dacwadda qaaday la socodsiiyaa gefaha waana in loo gudbiyaa Taliyaha Ciidanka Booliska, oo markii uu ka baaraandego, oggolaan kara, amrina kara in ciqaabta lagu faafiyo Codka Ciidanka laguna xareeyo galtirsigagefaha.

## QODOBKA 63aad

**Awoodda Taliyaha ee Wax Ka Beddilidda Xukun Ciqaabeed**

1. Haddii taliyaha Ciidanka Booliska ay la noqoto in ciqaabta gefaha la saaray aysan u dhigmin culayska ama duruufaha gefka la galay, wuu baa'bin karaa, yarayn karaa ama kordhin karaa ciqaabta, beddeli karaa ama amri karaa in dib loo baarodacwadda.

2. Qaadista gef asluubeedyada ku qoran xeerkan ama sharciga, Xeerka Habka Ciqaabta ayaa lagu dhaqmayaa intiisuurtogal.

## CUTUBKA11aad

## GEFAF ASLUUBEED

## QODOBKA 64aad

**Gefafka**

Gefefka asluubeed ee lagu qaadi karo xubnaha ka tirsan Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waa kuwa soo socda:

1. Ixtiraam la'aan loo geysto xubin ka sarraysa oo lagu muujiyo hadal, ficil iyo hab dhaqan kale.

2. Si ula kac wax uga qaban waaya, ka baaqsada ama ka daaha deg deg u fulinta amar uu bixiyey qof ka daraja sarreeya hadii amarku aanu si cad sharci darro uaheyn.

3. Diido amar sharciah.

4. Salaami waaya xubin ka darajasarraysa.

5. Gala ama jooga sabab shaqo la'aan meelaha dadweyanaha u furan isaga oo sita lebbiska ciidan.

6. Seexda/hurda isaga oo shaqohaya.

7. Sigaar cabba, qaad cuna, caga jiida, yabqa isaga oo haya shaqo ilaalo gaar, gaardis ciidan ama shaqo la midah.

8. Ka baaqda in uu soo sheego meesha uu ku sugan yahay muddo ka yar 48 saacadood ama ku meel gaar ahaan uga maqnaada fadhigiisa ama meeshii lagu ogaa sababla'aan.

9. Ka taga ilaalinta goobtii shaqada ama beddela dhabbihii shaqada loo cayimay, iyada oo aanay jirin amar ama sabab kale oo macquulah.

10. Ka maqnaada ama ka daaha gaardis ciidan ama shaqo loo cayimay, iyada oo aanay jirin sabab macquulah.

11. Muujiya dhaqan asluub xumo ama taxadar la'aan wakhtishaqo.

12. Daryeeli waaya jirkiisa, lebiskiisa, hubka & qalabka kuqoran.

13. Muujiya dhaqan gurracan oo ay ka muuqato aadaab xumo & adyad(dhibaateyn).

14. Fulin waaya amar la siiyey wakhti la hayey shaqo la xiriirta ilaalo roondo ama gaarah.

15. Isaga oo qaba jirrooyinka la kala qaado ama fida, madaxdiisa si deg deg ugu soo sheegi waaya ama isu ekeysiiya in uu jirranyahay.

16. Qaadan waaya dawadii loo qoray isaga oojirran.

17. Uga baaqda sabab la'aan ururinta & isku dubbaridista warbixinno ay waajib tahay in la dhammaystiro lanadiro.

18. Ka baaqda waajibka diiwaan gelinta ama ku qoridda waraaqaha/dukumiintiyada rasmiga ah.

19. Ku qora waraaqaha/dukumiintiyada rasmiga ah warbixin ama caddayn been ah, isaga oo ogsoon in ay been tahay ama u haysta sabab macquul oo loogu aamini karo in ay been tahay.

20. Horjoogsada ama dib u dhiga geynta ama gudbinta cabasho ama dacwad lid ku ah xubin kale oo ka tirsan CiidankaBooliska.

21. Ku soo ooga dacwad been ah xubin ka tirsan Ciidanka Booliska isaga oo ogsoon in ay been tahay.

22. Isaga oo ka cabanaya xubin kale oo ka tirsan Ciidanka Booliska, ku sheega arrimo uu og- yahay in aysan runahayn.

23. Qoraal ku kaalmeeya ama ka qayb qaata qorista xaashi ama cabasho dahsoon (oo aan la aqoonin ciddaqortay).

24. Ka qaata deyn Ciidanka dhexdiisa ama dadka kale iyada oo aanay jirin rajo macquul ah oo uu ku bixin karo ama ku dedaali waaya in uubixiyo.

25. Ka qeybqaata, oggolaada ama ka hortagi waaya khammaar ka socda xeryaha, saldhigyada ama fadhiyadaBooliska.

26. Ka baaqda in uu si buuxda oo run ah uga warramo naftiisa iyo xaaladiisa dhaqaale marka sidaas laweydiisto.

27. Isaga oo aan loo fasaxin, aqbala howl ka baxsan waajibaadkii iyo shaqada Ciidanka xitaa haddii ay tahay lagacla'aan.

28. Qaata lebbis rayid ah isaga oo laga doonayo lebisciidan.

29. Isaga oo fasax ah marka ugu horraysa ee ay suurtagal tahay wargelin waaya saldhigaugu dhow.

30. Ku daaha fasax dheer ama mid gaaban iyada oo aanay jirin sabab lagu qancikaro.

31. Ka taxaddari waaya ama u feejignaan waaya tabobar ama si qaab daran u dhaqma waqtiga gaardiskaciidan.

32. La dagaallama ama daandaansada xubin la darajoah.

33. Ula dhaqma dadweynaha si edab darro ama daryeel la'aanah.

34. Ka baaqda in uu tillaabadii ku habboonayd ka qaado xubin gashay gefasluubeed.

35. Ka baaqda in uu tabobar ku filan siiyo ciidanka uu madaxda uyahay.

36. Ka baaqda in uu waajibaadkiisa guto isaga oo muujinaya cabsi xad dhaaf ah oo ku saabsan halis aansugneyn.

37. Ka baaqda in uu oofiyo shuruudo xannibaadeed oo la saaray ama sabab la'aan kaga taga meesha lagu xannibay.

38. Iyada oo aan wax loo dhimin faritaannada ciqaabta ee ku xusan Xeerka Ciqaabta ee Ciidammada xilliga dagaalka, handada ama wax u dhima sharafta, haybadda ama qofnimada xubin ka darajosarreysa.

39. Handada xubin ka darajo hooseysa ama si ula kac ah wax ugu dhima sharafteeda ama qofnimadeeda.

40. Ka horyimaadaa qabashada ama kaxeynta xubin la darajo ah ama ka hooseeysa oo waajibkeedu yahay in ay qabato amakaxeeyso.

41. Diida amarka askeri waardiyeah.

42. Wax ka qaban waayaa codsi leh sababo sharci ama macquul ah oo uga timid qof ka mid ahdadweynaha.

43. Ka baaqda in uu gargaarka loo baahan yahay siiyo qof dhaawac ah, buka ama si kale gacan ugubaahan.

44. Kula isticmaalaa xoog ama dacdareeya qof lagu aaminay ilaalintiisa &xannaanayntiisa.

45. Ka baaqda in uu siiyo gacantii loo baahnaa xubin ka tirsan Ciidanka Booliska oo qabanaysa ama kaxaynaysa xubin kale oo gashay dembi ama gefasluubeed.

46. Iyada oo wax loo dhimin Ciqaabaha ku xusan Xeerka Ciqaabta, ka baaqda in uu si habboon u ilaaliyo qof maxbuus ah ama lagu aaminayilaalintiisa.

47. Ka baaqda in uu u sheego madaxdiisa meesha uu ku sugan yahay qof la baafinayo ama qofkaas horkeeni waayacadaaladda.

48. Si sax ah uga jawaabi waaya su’aalaha garsoorka hortiisa ama marka la baarayo gef asluubeed.

49. Iyada oo aan wax loo dhimin sharciga Ciqaabta, qaada, qalqaalsada ama aqbala isaga oo aan heysan oggolaansho ama sabab kale oo macquul ah tixgelin uu ku helo gaadiid, alaab la siiy ama wax-u-qabasho nooc kastaah.

50. Ku kaca fal ama fal dhaaf nooc kasta ah oo wax u dhimaya nidaamka wanaagsan & asluubta Ciidanka Booliska, oo aan si cad loogu sheegin meerisyada hore iyada oo la raacayo xeerkan ama jebiya faritaannada sharcigaBooliska.

51. Xubin kasta oo ku kacda mid ka mid ah gefafka asluubeed ee kor ku xusan waa la qaban karaa, la baari karaa, waxaana la saari karaa ciqaab u dhiganta culayska, heerka &nooca gefka.

# CUTUBKA 12aad

## CIQAABTA IYO RACFAANKA

# QODOBKA 65aad

## Ciqaabta

Ciqaabta asluubeed ee la saari karo xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waa kuwa soo socda:

1. Canaan afka ah dhammaan darajooyinkaCiidanka

2. Canaan loogu qorayo gal tirsigooda dhammaandarajooyinka

3. Ganaax lacageed:

    (a) Mushaarka oo laga gooyo qadar aan ka badnayn afar meelood meel mushaar bileedka asalka ah darajooyinka Saraakiisha &Kormeerayaasha.

    (b) Aan ka badnayan shan meelood meel darajooyinka Labo Alifleyaasha & Seddex Alifleyaasha.

    (c) Aan ka badnayan lix meelood meel Dableyaasha & HalAlifleyaasha

4. Lagu hayo ama lagu xiro xerada ama guriga 1 maalin ilaa 21 maalmood dhammaan Darajooyinka.

5. Lagu xiro qolka asluubta 1 maalin ilaa 21 maalmood Dable IlaaS/Alifle

6. Laga reebo hal kororsiimo mushaar oo waqti ka waqti ah haddii ayjirto.

7. Digniin kama dambeys ah oo qoraal ah taas oo shaqada looga eryayo hadduu gef asluubeed kale layimaado.

8. Dhimid darajo ama lumin gunno xirfadeed dhammaanDarajooyinka.

9. Ka joojin shaqo dhammaandarajoojinka

10. Shaqo ka siideyn (rukhseyn) dhammaandarajooyinka

11. Ka saarid shaqada ciidanka dhammaandarajoojinka

12. Sharaf dhac kaga eryid dhamaandarajoojinka

## QODOBKA66aad

## Oogista Ciqaab Asluubeed

Xubnaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug, waxaa ciqaab asluubeed soo oogi kara:

**(a)** **Taliyaha:**
Ugu badnaan shaqo ka joojin dhammaan saraakiisha ama shaqo ka eryid darajoojinka kale oo dhan.

**(b)** **Sarreeye ama SarkaalSare:**

(I) Ilaa ugu badnaan xarig guri 1 maalin ilaa 21 maalmood saraakiisha ka darajo hooseysa &Kormeerayaasha

(II) Ilaa ugu badnaan xarig qolka asluubta 1 maalin ilaa 21 maalmood laga billaabo darajada Dable ilaaS/Alifle.

**(c)** **Sarkaal:**

(I) Ilaa ugu badnaan 7 casho oo xarig guri ah sarkaal kasta oo ka darajahooseeya

(II) Ganaax lacageed oo aan ka badnayn shan meelood meel mushaarkiisa asalka ah ama xarig guri oo aan ka badnayn 10 maalmood Kormeerekasta

(III) Ilaa ugu badnaan xarig qolka asluubta min hal ilaa 21 maalmood Dable ilaa S/ Elifle

**(d)** **Kormeere ah TaliyeFadhi:**

(I) Ilaa ugu badnaan canaan lagu qoro gal tirsigiisa kormeere kasta oo ka daraja hooseeya fadhigiisana katirsan.

(II) Ilaa ugu badnaan xero ku hayn 1maalin ilaa 7 maalmood ama ganaax aan ka badnayan 5% mushaarkiisa L/Alifle ilaa S/Alifle fadhigiisa katirsan.

(III) Ilaa ugu badnaan xarig qolka asuubta ah oo gaaraya 1 maalin ilaa 15 maalmood Dable ilaa Alifle fadhigiisa katirsan.

**(e)** **L/Alifle ama S/Alifle Taliye Fadhiah:**

(I) Ilaa ugu badnaan xayiraad gaaraysa 1 maalin ilaa 5 maalmood L/Alifle kasta oo ka darajohooseeya

(II) Ilaa ugu badnaan xarig qolka asluubta ah oo gaaraya 1 maalin ilaa 10 maalmood Dable &

Alifle kasta oo fadhigiisa katirsan

# QODOBKA 67aad

## Racfaanka

1. Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska ee la saaray ciqaab asluubeed iyada oo loo cuskanaayo xeerkan oo aaminsan in xaq darro lagu ciqaabay ama ciqaabta loo saaray si xad dhaaf, waxa ay racfaan qoraal ah u qaadan kartaa madaxda sare ee awoodda u leh muddo 15 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda ciqaabtubillaabatay.

2. Haddii xubintu aanay ku qancin go'aankii racfaanka, waxa ay racfaan kale u qaadan kartaa madaxda sare ee awoodda u leh muddo 30 maalmood gudohood ah laga bilaabo taariikhdii loo sheegay natiijada racfaankiihore.

3. Xubnuhu waxa ay had & jeer xaq u leeyihiin in ay racfaan u qaataan Taliyaha iyaga oo sii marinaya cidda ku habboon xagga jaranjarada kala sarreyntaciidanka.

4. Racfaan kasta oo laga qaadanayo go'aanka TaliyahaCiidanka Booliska waxaa loo gudbinaya Wasiirka Amniga Gudaha iyada oo la raacayo jaranjarada kalesarreynta.

5. Iyada oo wax kasta xeerkan ku qoran halkoodii yihiin, ka dib marka la isticmaalay dhammaan xuquuqda racfaan ee ku xusan qodobkaan, wax diidayaa ma jiraan in xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska u gudbin karto cabasho, iyada oo sii marinaysa cidda ku habboon jaranjaro ahaan, Madaxweyaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug oo ah Taliyaha Guud ee Ciidammada AmnigaGalmudug.

# QODOBKA 68aad

## Gudbinta Racfaannada

Sarkaal ama xubin kasta oo fadhi taliye ka ah oo uu uga yimid xubin uu madax u yahay racfaan ay ka qaadatay ciqaab asluubeed waa in uu, isaga oo dhowraya nidaamka ku qoran xeerkan, u gudbiyaa racfaanka madaxda ka sarreysa ee awoodda u leh isaga oo raacinaya ra'yigiisa oo sababaysan.

# CUTUBKA 13aad

## MUTAYSIYADA SHAQADA

# QODOBKA 69aad

## Aqoonsiga Muteysi Gaar Ahaaneed oo Shaqo

Abaalmarin gaar ah waxaa la siin karaa xubin kasta oo qabata howl gaar ahaaneed oo leh tixgelin gaar

ah kana baxsan howlaha caadiga ah ee Booliska.

## QODOBKA 70aad

## Abaalmarinnada La Bixin Karo

1. Xubnaha Ciidanka Booliska waxaa la siin karaa abaalmarinnada soosocda:

**(a) Saraakiisha:**
- Ammaan caadiah
- Ammaan maamuusleh
- Abaalmarin qiimo geesinimoboliis
- Dallacaad mudnaan gaarahaaneed
- Xushmadayn(Maamuus)

**(b) Kormeerayaal &Alifleyda:**
- Ammaan caadiah
- AbaalgudLacageed
- Abaalmarin fasax gaaraya ilaa 15maalmood
- Ammaan maamuusleh
- Abaalmarin qiimo geesinimoboliis
- Dallacaad mudnaan gaarahaaneed
- Xushmadayn(Maamuus)

**(c) Dabley**
- Ammaan caadiah
- Abaalmarinlacageed
- Ammaan Maamuusleh
- Abaalmarin qimo geesinimohowleed
- Xushmadayn(Maamuus)
- Dallacaad mudnaan gaarahaaneed
- Fasax abaalmarineed oo gaaraya ilaa 10maalmood

2. Taliyaha Ciidanka Booliskuwaxa uuawood u leeyahay in uu bixiyo mid kasta oo ka mid ah abaalmarinnada kor lagu soo sheegay marka laga reebo dallacaadda mudnaanta gaar ahaaneed ee Saraakiisha & xushmadayntooda, oo uu bixin karo Madaxweynaha Dawlad-GobaleedkaGalmudug.

3. Madaxda soo socota waxa uumid kasta awood u leeyahay in uu siiyo abaalmarinnada ku hoos qoran xubnaha ka tirsan Fadhiga uu Madaxda kayahay:

**(a) Taliye Qayb Guud, Fadhiyada ama Xafiisyada la mid kaah:**
- Ammaan caadi ah darajokasta.
- Abaalmarin fasax gaaraya 10 maalmood Kormeerayaasha, Alifleyda &Dableyda.

(b) **Taliye Qayb ama Fadhiyada la mid kaah:**

- Ammaan caadi ahSaraakiisha.
- Abaalmarin fasax oo gaaraya 7 maalmood darajo kasta marka lagareebo Saraakiisha.

(c) **Taliye Saldhig ama fadhi la mid ah:**

- Ammaan caadi ah Kormeerayaasha, Alifleyda, &Dableyda
- Abaalmarin fasax gaaraya ilaa 5 maalmood Kormeersayaasha, Alifleyda,& Dableyda.

## QODOBKA 71aad

**Faafinta Abaalmarinnada**

Sarkaalka, Kormeeraha ama Aliflaha siiya abaalmarin xubin ka tirsan Ciidanka Booliska waa in uu faahfaahinta abaamarinta la xiriirta ku qoraa waraaqaha xafiiskiisa, nuqul ka mid ahna u soo diraa Taliyaha Ciidanka Booliska, si loo ogaado laguna faafiyo Codka Ciidanka looguna qoro gal tirsiga xubinta ay khuseyso.

## CUTUBKA 14aad

## QODOBO GUUD

## QODOBKA 72aad

**Miisaaniyadda Ciidanka Booliska**

1. Dhaqaalaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmud waxa uuka imaankaraa:

(a) Qoondada Madax-Misaaniyadeedka Booliska ee Miisaanayadda Wasaaradda Amniga Dawlad-GobaleedkaGalmudug;

(b) Kaalmada iyo kabis Miisaaniyadeedka Xukuumadda iyo Dawladdaha Hoose ee Galmudug ama Dawladda FederaalkaSoomaaliya;

(c) Kaalmo caalami ah oo loo soo mariyay Dawladda-Gobaleedka Galmudug ama Dawladda FederaalkaSoomaaliya;

(d) Qormada ganaaxyada qanuunigaah;

2. Dhaqaalaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxaa lagu maamulayaa si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyadda Dadweynaha, xeernidaamyada iyo habraacyada laga soosaaro.

3. Wasiirka Amniga Gudaha ee Dawlad-Gobaleedka Galmudug iyo ciddii kale ee uu u wakiisho waxa ay masuul ka yihiin ilaalinta, kormeerka, dabagalka habsami u maamulka MiisaaniyaddaBooliska.

## QODOBKA 73aad

**Dhawrka Ciidanka Booliska**

Hanti- Wasiirka waxa uuu magacaabayaa hanti-dhawrka gudaha oo u gaar ah Booliska oo ka kooban xubno ka socda Wasaaradda iyo Saraakiil Boliis ah, kuwaas oo dhammaantood laga rabo in ay yihiin kuwo waayo aragnimo iyo aqoon u leh xisaabaadka isla markaasna shaqayn kara xilliyo cayiman ama markii loo baahdo.

## QODOBKA 74aad

**Dhismaha Sanduuqa Daryeelka Ciidanka Booliska**

Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxaa loo samayn karaa sanduuq dhaqaale oo ku yimaada qaaraanka Ciidanka Booliska dhexdooda ah, waxaana laga soo saari doonaa xeernidaamiye gaar ah.

## QODOBKA 75aad

**Gal Shaqsiyadeedka Ciidanka Booliska**

Xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska, gal shaqsiyadeed ka kooban dhammaan dikumiintayada iyo arimaha khuseeya maqaamkiisa shaqo iyo xirfad, ayaa loo furayaa lalana socon doonaa.

## QODOBKA 76aad

**Kala Saraynta Darajooyinka**

1. Darajooyinka Ciidanka Booliska waxa ay u kala sareeyaan sida soosocda:

   (a) Sarreeyayaasha

   (b) Saraakiisha Sare

      (i) Gaashaanle Sare

      (ii) Gaashaanle Dhexe

      (iii) Gaashaanle

   (c) Saraakiisha

(i) SaddexXiddigle

(ii) Labo Xiddigle

(iii) Xiddigle

(d) Kormeerayaasha

(i) KormeereSaddexaad

(ii) KormeereLabaad

(iii) KormeereKoowaad

(e) Alifleyda

(i) SaddexAlifle

(ii) Labo Alifle

(ii) Alifle

(f) Askarta

(i) Dable

(ii) Dhibbow

2. Marka laga reebo xaaladaha leh marxalado gaarka ah, xubinta Ciidanka Booliska ugu darajo sarreysa ayaa noqonaysa Taliyaha Fadhiga uu ka tirsan yahay.

3. Haddii ay jirto maqnaansho ama caqabad kale oo la soo gudboonaata sarkaalka u taliya fadhi, xubinta Ciidanka Booliska ee darajo ahaan ku xigta ayaa ku-simaha taliye fadhi u noqonaysa. Haddii ay jiraan xubno badan oo isla darajo isku mid ah ka ah fadhi, ku- simaha Taliyaha ayaa noqonaya kan ugu sarreeya dhexdooda haddii uu san Taliyaha amrin sikale.

## QODOBKA 77aad

## Garaadaha Darajooyinka

1. Garaadaha darajooyinka saraakiisha Ciidanka Booliska waxaa lagu go'aaminayaa wareegto Madaxweyne oo laga soo saaray ujeeddadaas marka uu arko soo jeedinta Taliyaha Ciidanka isla markaana la dhagaysto taladawasaiirka.

2. Garaadaha darajooyinka kale oo dhan waxaa go'aaminaya Taliyaha Ciidanka marka uu la tashi

kala sameeyoWasiirka.

## QODOBKA78aad

**Dareeska &Qalabka**

Haddii aan si kale loo qeexin, xubnaha Ciidanka waxa ay xiranayaan marka ay shaqada ku jiraan, dareeska loogu tala galay si ay u gutaan waajibaadkooda, waxa ay qaadanayaan hub iyo rasaas sida iyo marka uu u amro Taliyaha Ciidanka.

## QODOBKA 79aad

**Habraacyada**

Taliyaha Ciidanka Booliska Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa uumararka qaar soo saarayaa habraacyada muhiimka u ah fulinta tilmaamaha iyo xeernidaamiyaasha xeerkan.

## QODOBKA80aad

**Xeer nidaamiye-yaasha**

Wasiirka Amniga Gudaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug waxa uuwareegto Wasiir ku soo saarayaa xeernidaamiyaasha khuseeya qodobada xuquuqaha, shaqada iyo ciqaabasluubeedka,

fasaxa, dallacaaddda, bixinta abaalmarinnada, magacaabista, qorista, billadaha, ammaanta iyo qodob kasta oo kale ee ku habboon maamul wanaagga guud ee Ciidanka Booliska.

## QODOBKA 81aad

**Baabi'in**

Waxaa la baabi'iyay sharci, xeer, iyo xeer nidaamiye kasta oo jiray ee lagu dhaqo Ciidanka Booliska ama qodobo kale oo kasta ee ka hor imaanaya ama aan la dhaqan geli karin Xeerkan.

## QODOBKA 82aad

**Dhaqangalka Xeerka**

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu ansixiyo Golaha Shaci-dejinat Dawlad-Gobaleedka Galmudug uuna saxiixo Madaxweynaha Dawlad-Gobaleedka Galmudug, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.